612-871-1145 | mngi.com

# U DIYAAR GAROOWGA BAARITAANKA QAYBTA SARE EE DHEEFMAREENKA EE ILMAHA (EGD)

**Liiska Waxyaabaha Aad samaynayso**

- Akhri foomamka kahor baaritaanka oo u raac tilmaamaha diyaar garoowga si taxadar leh.
- Xaqiiji in waalid sharci ah ama masuul uu la joogo ilmaha maalinta baaritaanka.
- Samee qorsheyaal aad kula joogayso ilmahaaga ama qof kale oo wayn uu la joogaayo ilmahaaga 12 saac kadib baaritaanka.

Badqabka ilmahaaga awgiis, **JOOJI** dhammaan dareereyaasha waxna yuusan afka ka qaadan 3 saacadood kahor baaritaanka ilmahaaga ama baaritaanka ayaa la baajin doonaa kadibna dib loo dhigi doonaa. Fadlan raac tilmaamaha faahfaahsan ee hoose.

**Muhiim, fadlan dib u eeg qaybtan haddii aad qaadato dawo loo yaqaan GLP-1 agonist** (sida Ozempic, Weygovy, Trulicity, Rybelsus, Saxenda, Byetta ama kuwa kale) ama SGLT-2 Inhibitor (Invokana, Farxiga, Jardiance, Steglatro) oo loo isticmaalo yaraynta miisaanka ama macaanka.

Haddii aad qaadato daawooyinkan, markaa waa inaad dawada u hakisaa sida waafaqsan tilmaamaha soo socda:

GLP-1 Agonists (Ozempic, Weygovy, Trulicity, Rybelsus, Saxenda, Byetta ama kuwa kale):

- Cirbadaha hal ama laba jeer la isku mudo maalintii (tusaale Byetta, Victoza, Saxenda), haki maalinta ka horeysa iyo maalinta ka dambeysa baaritaanka.
- Cirbadaha todobaadkii mar la isku mudo (tusaale: Trulicity, Ozempic, Weygovy, Bydureon, Mounjaro), haki 7 maalmood ka hor baaritaanka.
- Qiyaasta daawada, ee maalin walba afka laga qaato (tusaale: Rybelsus), haki 7 maalmood ka hor baaritaanka.

SGLT-2 Kahortagayaasha (Invokana, Farxiga, Jardiance, Steglatro): Haki 4 maalmood ka hor baaritaanka.

**<u>Haddii aad u qaadato daawooyinkan sonkorowga, markaa waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto kooxdaada daryeelka aasaasiga ah ama dhakhtarka endocrinologist (dhakhtarka ku takhsuusey xanuunada hormuunka) si aad u hesho tilmaamaha maareynta gulukoosta.</u>**

**Haddii aad leedahay baaritaanka EGD (Upper endoscopy) oo aad qaadato daawooyinkan,** markaa waa inaad bilowdaa cunto dareere saafi ah **<u>24 saacadood</u>** kahor baaritaankaaga. Tani way ka duwanaan doontaa tilmaamahaaga sheegaya inaad bilowdo cunto dareere saafi ah 11:45 habaynimo habeenka ka horeeya. Tusaale ahaan, haddii baaritaankaagu uu yahay 8:00 subaxnimo, markaas waa inaad bilowdaa cunto dareere saafi ah 8:00 subaxnimo maalinta ka horaysa. Hubi inaad raacdo tilmaamaha NPO (wax afka laga qaadanayo majiraan kahor 3 saacadood baaritaankaaga). Hakinta daawooyinkan iyo sii wadista dareeraha saafiga ah ayaa muhiim noogu ah in aan si badbaado leh u dhamaystirno baaritaankaaga.

**Jooji ama Dib U dhig Balantadaada:**
Haddii aad qabto astaamo u eg kuwa hargabka (sida qandho, qufac, neef yari) 14 maalmood gudahood xiliga balantaada kahor, fadlan wac si dib loogu muddeeyo. Haddii aad qabto wax xanuun kale oo dhawaan lagaa helay (sida cayayaanka caloosha gala (diverticulitis), xanuunnada wadnaha, dhibaatooyinka

neefsiga), fadlan wac xafiiskeena. Haddii aad u baahan tahay inaad baajiso ama dib u dhigto balanta sabab kasta oo kale awgeed, wac 612-871-1145 ugu yaraan 72 saacadood kahor xiliga balantaada.

**Qofka Masuulka ka ah:**
Fadlan xasuuso in qof masuulka ka ah ay tahay inuu kula socdo maalinta baaritaankaaga, ku raaco marka lagu bixiyo, kuu kaxeeyo guriga kadib marka aad marto baaritaanka oo uu kaa caawiyo daryeelka la socodka. Waxay tani ku dhawaad qaadataa ilaa 2 saacadood imaatinka ilaa ka bixitaanka. Ma awoodi doontid inaad gaadhi kaxaysato, ku shaqayso mishiino waawayn, ama aad qabato shaqada ilaa laga gaaro maalinta xigta. Hadii aad soo kaxaysan waydo qof masuul ah waxay keeni kartaa in balantaada dib loo dhigo.

Bukaanada qaar waxay la kulmaan xasuusta oo uga guurta si kumeel gaadh ah kadib baaritaanka iyaddoo oo ay ugu wacan tahay suuxdin laga warhayo oo lagu sameeyo. Waxaa dhici karta inaad u baahato in qofka masuulka ah uu kula joogo marka aad ka baxayso oo uu u sameeyo qoraalo isagoo adiga ku metelaya oo u waydiiyo su'aalaha wixii daryeelkaaga la socodka ah la xidhiidha.

Haddii bukaanku uu yahay ilmo yar ama uu u baahan yahay masuul sharci ah, masuulka sharciga ah waa inuu joogaa marka uu imanayo bukaanku maalinta baaritaanka. Haddii masuulka sharciga ah aanu awoodin inuu joogo marka la keeno ilmaha, waxaa looga baahan yahay inuu ku jiro taleefanka muddada baaritaanka iyo ilaa inta bukaanka la bixinayo.

**Habeenka ka horeeya baaritaankaaga:**

- Jooji cunista cuntooyinka adag oo biloow dareere saafi ah saacadu markey tahay **11:45habeenimo**. Dareereyaasha saafiga ah waxaa ku jira waxyaabaha aad ka dhex arki karto.
    - Tusaalooyinka cuntada dareeraha saafiga ah waxaa ka mid ah: biyo, maraq cad ama maraq khafiif ah (doorashooyinka xorta ah ee gluten ee la heli karo), Gatorade, Pedialyte ama Powerade, cabitaannada fudud ee kaarboon ku jira iyo kuwa aan kaarboonaysnayn (Sprite, 7-Up, Gingerale)), casiirka khudradda miiran ee aan saxarka lahayn ( tufaax, canab cad, karanberry cad), Jell-O, popsicles, iyo ilaa hal koob oo qaxwo madow ama shaah ah (caano ama kareem aan lahayn) maalin kasta.
    - Waxyaabaha soo socda lama oggola in lagu daro cuntada dareeraha saafiga ah: cabitaannada casaanka ah, cabitaannada khamriga, caanaha, isku darka barootiinka, maraqa kareenka ah, cabitaanka liinta, waxyaabaha ay ku jirto saliida iyo ruugista tubaakada.
    - Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan raacitaanka cunto dareere ah oo saafiya, fadlan eeg https://www.mngi.com/conditions/clear-liquid-diet

**Maalinta baaritaankaaga:**
**Daawooyinka Subixii**
Ilmahaaga ayaa qaadan kara dhammaan daawooyinka subixii ayna ku jiraan daawooyinka dhiigkarka, daawada dhiiga jilcisa (haddii uusan xafiiskeenu kugu amrin joojin daawooyinkaan), methadone, daawada kahortaga qalalka adoo ku laqaaya kabo biyo ah **3 saacadood kahor baaritaankaaga ama kahor**. Ha cunin wax feetamiino ama kaalmaati ah oo la ruugi karo. Si looga fogaado in la baajiyo balanta, ha isticmaalin xashiishka/THC maalinta ka horeysa baaritaankaaga. Haddii ilmahaagu uu qabo sonkoroow, la xariir qofka kormeerka kugu wada si aad u hesho tilmaamo dheeri ah oo ku saabsan insulin iyo/ama maaraynta sonkorta dhiiga.

Sii wad dareeraha Khaliga ah ilaa **3 saacadood kahor baaritaankaaga,** kadibna jooji cabista. Xasuusin ahaan, sii wad inaad aska ilaaliso cabitaanka cas, cabitaannada khamrada, caanaha, iskudarka barootiinka, maraqa kareemka ah, cabitaanka liinta, waxyaabaha ay ku jirto saliida, tubaakada la ruugo iyo daawooyinka maandooriyaha ah. Adeegsiga maadooyinkaan ayaa keenaysa in baaritaankaaga la baajiyo.

- **3 saacadood kahor:**
  - JOOJI cabista dhammaan dareereyaasha saafiga ah.
  - Waxba afka haka qaadan inta lagu jiro waqtigaan.

**<u>Hore u soo qaado waxyaalahaan soo socda xiliga baaritaankaaga:</u>**

- Kaarka Caymiska / Sawirka AQOONSIGA
- Liiska Daawooyinka Hadda
- Daawada Neefta loo Dhuuqo: Soo qaad daawada neefta ee la dhuuqo ee ilmahaaga haddii uu hadda u adeegsado xakamaynta xanuunka neefta
- Agabka Ookiyaalaha Indhaha: Ilmahaaga ayaa laga codsan doonaa in uu iska baxsho ookiyaalaha indhaha kahor inta aan baaritaankaaga bilaaban
- Dardaaranka Horey loo sii Qoray: Haddii aad haysato Dardaarooyinka hore Loo sii qoray, fadlan la imoow nuqulka Dardaarankaaga Horey Loo sii qoray balantaada baaritaanka uur ku jirta. Dardaarooyinka hore Loo sii qoray ayaan lagu tixgelin xarumaha MNGI, iyo marka ay jirto xaalad nolosha khatar ku ah, talaabooyinka badbaadinta nolosha ayaa la samayn doonaa markasta bukaanadeena ayaana la gayn doonaaxarunta daryeelka heerka sare ah (tusaale, isbitaal). Marka ay dhacdo xaalada lama filaanka ah ee aad u baahato in degdeg laguugu wareejiyo xarun daryeel oo naga saraysa, Dardaarankaaga Horey Loo sii qoray ayaa kuu raacaaya xaruntaas.

**<u>QEEXITAANKA ISKAANKA QAARKA KORE EE DHEEFMAREENKA</u>**

**Waa maxay iskaanka qaarka kore ee dheefmareenka?**
Iskaanka qaarka kore waa baaritaan loo sameeyo si loo baaro xanuunka qaybta kore ee caloosha, dhiigbaxa, lalabada, matagga ama dhibaatada dhanka wax liqida. Inta lagu jiro baaritaanka, dhakhtar ayaa baara geesaha hungurigaaga, caloosha iyo qaybta koobaad ee xiidmahaaga asagoo adeegsanaaya tuubo dhuuban, oo jilicsan oo la yiraahdo endoscope. Haddii burooyin ama cilado kale la arko, dhakhtarka ayaa soo jari kara jiirka ciladaysan si loosii baaro, ama loo gaaro cadka. Haddii aad dhibaato ku qabto wax liqida, waxaa suuragal ah in aaga la balaarsho inta lagu jiro habraaca.

**Waxa ay tahay inaad filato inta lagu jiro baaritaankaaga:**

<u>Imaatinka xafiiska hore</u>
Marka aad timaadaan ilmahaaga ayaa heli doona jijinta gacanta ee aqoonsiga ah. Waxaa lagaa codsan doonaa xaqiijinta hinkaadda magaca buuxa ee ilmahaaga iyo taariikhda dhalashada.

<u>Kahor baaritaanka</u>**:**
Xubin kamid ah kooxda daryeelka baaritaanka kahor ayaa baari doonta caafimaadka ilmahaaga ayna ku jiraan miisaanka, cadaadiska dhiiga, garaaca wadnaha, heerka ogsijiinta iyo wakhtigii ugu danbeeyay cunto iyo cabitaan. Ilmahaaga ayaa sidoo kale laga codsan doonaa haddii uu dhameystay daawada diyaar garoowga iyo natiijooyinka diyaar garoowga.

Baaritaanka uurka ee kaadida ama shardi dhaafka baaritaanka uurka oo saxiixan ee bukaannada dumarka ah ama bukaannada leh minka ee jira 12 sano ama ka wayn, ama dhiiga caadadu ku dhaco, ayaa la qaadi doonaa. Aaga baaritaanka kahor, bukaanka ayaa laga codsan doonaa inuu keeno sanbalka kaadida si looga baaro kaadi. Natiijooyinka baaritaanka uurka ayaa loo sheegi doonaa bukaanka iyo waalidka/masuulka sharciga ah. Foomka shardi dhaafka baaritaanka uurka ayaa la heli karaa asagoo ah dookh badel ah.

Bukaanka ayaa intaas loo xiri doonaa shuluga caafimaadka iyo suun.

Booqashooyinka Kooxda Daryeelka

Waxaad la kulmi doontaa kalkaalisada baaritaanka ka hor (diiwaan gelinta) ee ilmahaaga, dhakhtarka caafimaadka uur ku jirta, kalkaalisada qolka baaritaanka, iyo bixiyaasha daawada kabaabisada. Waxay kuu sharxi doonaan doorka ay ka ciyaari doonaan daryeelka ilmahaaga, waxayna ka jawaabi doonaan su'aalo kasta iyo walaacyo kasta oo aad ka qabi karto habraaca ilmahaaga. Dhakhtarka caafimaadka uur ku jirta ayaa sharxi doona baaritaanka waxaana lagaa codsan doonaa inaad saxiixdo Foomka Ogollaanshaha Faahfaahsan, kaasoo sheegaaya in aad fahantay baaritaanka, khataraha iyo faa'iidooyinka, aadna bixinayso ogolaanshahaaga si loo sameeyo baaritaanka.

Xirfadyahanka daryeelka suuxinta ayaa samayn doona qiimeyn caafimaad oo lagu sameynaayo ilmahaaga kuuna sharxaaya suuxinta la adeegsan doono. Waxaa markale lagaa codsan doonaa inaad saxiixdo Foomka Ogolaanshaha Faahfaahsan oo sheegaaya in aad fahmayso qorshaha suuxinta aadna siineyso ogolaanshahaaga xirfadlaha daryeelka suuxinta inuu daryeelo ilmahaaga.

Waxa ay tahay inaad filato inta lagu jiro baaritaanka:

Kooxda daryeelka baaritaanka ayaa ilmahaaga keeni doona qolka baaritaanka Waxaa laguu duwi doonaa qolka sugitaanka waalidka halkaas oo aad ku sugi doonto waxaana lagu siin doonaa WIFI. Waa muhiim in ugu yaraan hal waalid joogo xarunta baaritaanka markasta lacala haddii dhakhtarka ama xubin kale oo kooxda daryeelka ah u baahado inuu kula hadlo.

Inta lagu jiro baaritaankaaga dhakhtarka suuxdinta ayaa kugu duraaya daawooyin kaana eegaaya calaamadaha aasaasiga ah taasoo ah hanaan loo yaqaano Daryeelka Suuxinta ee la Muraaqabeeyo (MAC). Inkastoo inta badan bukaannadu seexdaan inta lagu jiro baaritaanka, qaar ayaa wali soo jeeda oo ka warqaba waxa socda. Dhakhtarka suuxinta iyo/ama kalkaalisada suuxinta oo ruqsad leh (CRNA) ayaa gacan ka gaysan doona go'aaminta nooca saxda ah ee daawada la adeegsanaayo inta lagu jiro baaritaanka si loo ilaaliyo badqabkaaga aadana u xanuunsan. Haddii hilib aan caadi ahayn ama buro lagaa helo, dhakhtarka ayaa jari kara asagoo raacaaya tuubada scope si uu u arko ama kaamirada uur ku jirta la gasho.

Waxa ay tahay inaad filato kadib baaritaanka?

Kadib baaritaanka ilmahaaga ayaa loo wareejin doonaa qolka soo kabashada si uu ugasoo kaco suuxdinta. Ilmo kasta iyo qaliin kasta waa gaar, marka mudada uu ku jiraayo soo kabashada ayaa kala duwan. Ilmahaaga ayaa la geli doonaa tuubada IV kadib baaritaanka.

Kalkaaliso diiwaan gashan ayaa hubin doona neefta, garaaca wadnaha, cadaadiska dhiiga, iyo heerka oksijiinta ilmahaaga dhammaan inta uu ku jiro soo kabashada. Marka uu kaco uuna dareemaayo inuu wax cabi karo ilmahaaga ayaa la siin doonaa dareere iyo cunto fudud.

Ilmahaaga ayaa lala socon doonaa si looga eego cilado ka dhasha daawada taasoo ay ku jiri karaan xasaasiyada, dawakhaada, lalabada/ mataga mararka qaar, dhuun xanuunka, madax xanuunka, calool xanuunka iyo/a hurdada badan.

Dhakhtarka ayaa kaala hadli doona natiijooyinkii hore ee baaritaannada ilmahaaga. Hilib kasta ama burooyinka lagaa jaro inta baaritaanku socdo ayaa loo diri doonaa shaybaarka si loo baaro. Waxay qaadan kartaa 5-7 maalmood si laguugu wargeliyo natiijooyinka ayadoo laguugusoo diraayo boostada ama Barta Bukaanka.

Ka bixida aagga baaritaanka

Marka ilmahaagu diyaar u yahay inuu ka baxo xaruunka baaritaanka uur ku jirta waxaad heli doontaa tilmaamaha isbitaal ka bixida oo ka imaanaaya kooxdaada daryeelka. Ilmuhu waa inuu haystaa qof wayn oo la jooga 12 saacadood kadib marka baaritaanka la dhameeyo.